

**Jaalle Maj. General** MAXAMMED SIYAAD BARRE

MADAXWAYNAHA

GUDDIGA GOLAHA SARE EE TAWRADDA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADDIGA SOOMAALIYA

# AFKA DUGSIYADA DADKA WAAWEYN

## BUUGGA LABAAD

WAXA QORAY: GUDDIGA AFKA SOOMAALIDA

( MUQDISHO, 1971 )

PJ
2534
.A2
A34
1971
v. 2

## WARAN IYO KITAAB

Waxaa jiray wadaad mar la arko, wadan jirey waran iyo kitaab. Kitaabka wuxuu ku wadan jiray kilkilsha, waranka na gacanta. Labadooda midna ma dhigi jirin marna. Markuu salaadda tukanayo, meel u dhow, ayuu dhigan jiray.

Maalintii dambe ayaa waxaa lagu yiri: " Shiikhow ! maxaad waranka isaga dhigi weydey!!, waxaad tahay wadaade!!". Wuxuu yiri: " Waranka waxaan u haystaa aadane, kitaabkana waxaan u haystaa Ilaah". Midkaan waxaan rabaa inaan dad isaga celiyo, kanna waxaan rabaa inaan Ilaah isaga celiyo !.

Layli:

1. Wadaadku muxuu wadan jirey?
2. Kitaabka muxuu ku falin jirey?
3. Maxaa la weydiiyey wadaadkii ?

* * * * * * * * * * * * *

""""... Hantiwadaagnimada ku dhisan cilmiga oo keliya, ayaynnu kaga xoreyn karnaa dalkayaga gumeysiga, gumeysiga cusub iyo xoogga imberiyaalistaha.
"—— Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya
( 14 Noveembar 1971).

## IS RAACA SOOMAALIYEED

Soomaalidu waxay halgan ugu jirtey tan iyo dagaalkii dhawaa (1939 - 1945) teer iyo haddeer gobannimo. Meel kasta Soomaalidu ha joogtee, waxay u hurtay nafteeda iyo maalkee'a sidii ay israacaas u xaqiijin lahayd. Laba gobol, ayaa is raacay oo gobannimadooda iyo xornimadooda gaaray, hase yeeshee, weli is raacii dalkeenna iyo dadkeennaba, waxaa ka maqan saddex gobol, xeebta Soomaalida ee Faransiisku gumeysto, Soomaalida Galbeed ee Itoobiya haysato, N.F.D. ee Ingiriisku ka gatay Kiiniya.

Gabayaasha Soomaaliyeed waxay ku dadaaleen mar kasta, sidii ay dadka Soomaaliyeed is raaciisa ay uga dhacsiin lahaayeen.

Gabayaagii Soomaaliyeed, Faarax Shuuriye, isaga oo ka hadlaya israaca iyo wadajirka Soomaaliyeed, gabay wuxuu ku yiri:

Aasaaska nimankii lahaa urur ka Soomaali
Iyo aadnigii ka aqbalee amarka nooleeyey
Ee Uniyo oogada Cadmeed olol sidiis kaahshay
Iyo Faranji ooradu ku taal kala ilwaad roone!
Geesiga la soo aaday oo nuurashay deeqada e
Oo aan kala aqoon odiyo wiil idilka Soomaali
Iyo muudal la inkaarayaa kala ilwaad roone!!

( Faarax Shuuriye)

Layli:

1. Labada gobol ee dhulkeennu goormay is raaceen?
2. Sheeg gabayaashu dowrkay ka ciyaareen israaca Soomaaliyeed?
3. Faarax Shuuriye waaguu noola muxuu ku guubaabin jirey dadka Soomaaliyeed?

MUNISHIIBIYADA

Munishiibiyadu maxay tahay? Munishiibiyadu waa laan laamaha dawlada ka mid ah oo iskooda isu maamula. Guud ahaan waxay ka tirsan tahay qaybta Wasaarada Gudaha. Degma walba waxay leedahay Munishiibiyo u gaar ah oo maamusha.

Magaala walba Munishiibiyada joogta, waxay ku maamushaa wixii degmada u dan ah. Sharciga guud oo Munishiibiyyooyinka ka dhexeeya ka sokow, mid walba waxay sameeysan kartaa sharci ku habboon hawsheeda.

Hawlaha Munishiibiyada way badan yihiin oo waxaa ka mid ah:

- Magaalada hagaajinteeda, shatiyada bixintooda, magaalada nadaafadeeda, sharciga dhawriddiisa.

Munishiibiyada waxay wadataa magaca magaalada. Markii marti sharaf leh timaado, iyadaa bixisa furaha shafafta oo magaalada. Waxay leedahay xafiisyo badan oo kala sarreeya, askar salab sidda bay leedahay oo ka dhigan askarta gudaha.

Hawsha Munishiibiyadu qabato, waxaa ugu weyn cashuurta qaadiddeed. Taasoo oo lagama maarman ah, maxaa yeelay, lacagta cashuurta ka soo gashon ayaa lagu maamula hawlahoo dhan.

Madaxda Munishiibiyada waxay u kala baxdaa:

- Duqa Magaalada
- Gacan yaraha duqa
- Xoghayaha xafiiska iyo
- guddiga guud.

Layli: Erayadan ka dhig wadar.

1. Maamul. Shati. Gacanyare. Degmo. Cashuur. Nadaafad.
2. Sheeg meeqa Munishiibiyo buu leedahay gobolka Benaadir?

## ABAALGUD

Waxaa la yiri nin baa nin ku soo hoydey ( martiyey) habeyn. Markaasaa ninkii lagu soo hoydey si wanaagsan u sooray ninkii ku soo hoydey. Markaasana waxay ahayd abaar xun. Ninka lagu soo hoydey, ninkii ku soo hoydey meel wanaagsan ayuu seexshey. Waagii markuu beryey, ayuu ninkii lagu soo hoydey haddana u keenay sahay martidii, biyo uu ku dhul marana, wuu u keenay.

Markaasaa ninkii martida ahaa ku yiri ninkii uu soo martiyey: " Ninyohow! si wanaagsan, ayaad ii gashay, marka maxaad jeceshahay inaan kuugu abaal gudo!". " Ma shan jeer baan kuu abaalguda, mase shan goobood baan kaa sheegaa?!"

Markaasaa ninkii la soo martiyey yiri: " Waxaad iga sheegtaa shan goobood ".

Layli:

1. Ninkii la soo martiyey sidee buu ka yeelay ninkii ku soo hoydey?
2. Martida Soomaalidu sidee bay yeeshaa?
3. Abaar xun haddii lagugu soo hoydo, sidee baad yeeli lahayd?

* * * * * * * * * * * *

"""... Dadweynaha oo lala xiriiraa, waa waxa ugu weyn wax kasta, markii aynnu ku socono jidka horukaca. ""——Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya( 22 Mey 1971).

# K A B O O L E

Kabooluhu wuxuu dadka u sameeyaa kabaha. Kabooluhu waa shaqaale. Isagu wuxuu u dulqaataa dhibaatada iyo hawsha. Markii kabooluhu samaynayo kabo, wuxuu soo qaataa harag la magdiyey. Haraggaas wuxuu u kala jarjaraa dhawr meelood. Kabooluhu hargaha wuxuu ku jarjaraa qalab loo sameeyay farsamada kabaha. Farsamada kabooluhu waa hawl dalka intifaac u leh. Kaboolaha dhulkeennu wuxuu samayn karaa kabo kasta, maxaa yeelay ,isagu farsamada kabaha wuxuu ku bilaabay yaraan. Kabaha carruurta, kuwa ragga iyo kuwa haweenka waxaa dhammaantood sameeya kaboolaha. Magaalada Muqdishow, waxaa ku taalla warshad samaysa kabaha jaad kasta. Warshaddaasi waxay samaysaa kabo af fiiqan, kuwo af dhuudhuuban, kuwo balballaaran iyo kuwo saandal ah. Kabooluhu farsamadiisu kuma koobna samaynta kabaha keliya ee wuxuu sameeyaa haddana abxado, sanduuqyo hargo ah, siddeyaal, suuman; kiishado qurqurxan iyo dhar laga sameeyay harag.

Dhaqaalaha horukicisa kabooluhu wuxuu ka qaataa qayb libaax. Kabooluhu farsamada iyo jaangooyada kabaha aad buu aqoon weyn ugu leeyahay. Kabo markii ay kaa duqoobaan oo aadan iibsan karin kabo cuscusub, waxaad u geyneysaa kabihii duqoobay kaboolaha. Isagu lacag yar ayuu kaa qaadayaa, dabadeedna wuxuu kabihii duqoobay kaaga dhigayaa kabo cuscusub oo kale. Innagu waannu jecel nahay kaboolaha, maxaa yeelay, haddaan kaboole jireen kaba la'aan baannu ku socon lahayn.

Layli:

1. Kaboole maxaa loo yiri qofka kabaha sameeya?
2. Kabooluhu muxuu ka sameeyaa kabaha?
3. Farsamada kabooluhu dhulka dhaqaalihiisa maxay u tartaa?
4. Qofkii neceb kaboolaha maxaad ku sheegi lahayd?

## QODBAHA MAGACYADA DHEDDIG

Qodbaha magacyada dheddig waxay gadaal ka raacaan magacyada dheddiig. Ogow in qodobka " sha " uu tuuro xarafka "L" oo ugu dambeeya magaca dheddig sida ul = usha.

ta tu tii
sha shu shii
da du dii
dha dhu dhii

Qorraxda jiilaal wax ka kulul.
Mindidu af ma leh.
Afadii Guuleed baa timid.
Xiddigta waaberi iftiin weynaa!
Kabtu waa ka weyn tahay.
Sariirtii baa jabtay.
Bisha Soonqaad waa ajar badan tahay.
Dhiishu ma qabaa mase waa Argeeg?
Kuusha Asli way qurux badan tahay.
Qoodha iyo xerada wuu ka jabay
Gabadhu waa gari, carruurse ma leh.
Gabadhii tartanka ugu hormartay waa la abaal mariyey.

Layli:

Qor 12 tixood oo ay ku jiraan qodbaha magacyada dheddig nooc kastaba.

## INA - HOOYO WAA UUR HABREED

Waxaa la yiri, col ayaa weeraray reer meel deggan. Markaasuu colkii dilay dadkii oo dhan, xoolihiina dhacay. Markii dambe ayaa colkii, isagoo ka soo noqday cidihii, ayuu haddana wuxuu qabtay naag iyo walaalkeed iyo ninkeedii iyo wiilkeedii.

Dadkaas la qabtayna waxay ka mid ahaayeen cidihii la wada laayey. Ninkii abbaanduulaha u ahaa colka, ayaa goor la damcay in la dilo ninka iyo naagta iyo wiilka iyo walaalka ku yiri colkii " Ha dilinina, ee bal u suga in yar". Ninkii abbaanduulaha ahaa, wuxuu naagta ku yiri " Adigu waxaad tahay naag!, marka lagu dili maayo, inta kalena waa la wada dilayaa"! Markaas ayaa naagtii iska oydey oo ku tiri ninkii abbaanduulaha colka u ahaa: "Waxaan kaa doonayaa inaad walaalkay iyo ninkayga iyo wiilkayga ii daysaa, haddii aad layseen ciddayadii oo dhan?

Markaasaa ninkii abbaanduulaha ahaa ku yiri naagtii: " Wiilkaagu iyo ninkaagu iyo walaalkaaba waa niman,marka waa la laynayaa!!". Markaasay naagtii ku dhegtey ninkii abbaanduulaha ahaa labada lugood oo si xun u bariday. Markaasuu hadduu naagtii iska furfuri waayey, markii dambe ku yiri naagtii: " Waxaan kuu deynayaa hal qof, marka ka soo fiirso qofkii laguu deyn lahaa!. Ma waxaad rabtaa wiilkaaga, mase ninkaaga,mase walaalkaa.! Bal adigu kala dooro?". Abbaanduulihii wuxuu naagtii ku yiri. " Laba saac ayaad muddo

ka soo fiirso!. Labadii saac markii ay dhammaatay oo naagtii hadal laga waayey, ayuu ninkii abbaanduulaha ahaa ku yiri naagtii, " Marka saacaddii way dhammaataye kee doorataay?. Naagtii waxay tiri: Ii wada daa dhammaantood, waan ku baryayaaye?. Ninkii ciidanka watey wuu diidey.

Markii dambe, ayay tiri: " Marka waxaad ii deysaa walaalkay!!!" Markaasaa ninkii abbaanduulaha ahaa yaabay oo ku yiri naagtii " Walaalkay!!!". Naa ma waalan tahay!?." "Awaye wiilkaagii iyo ninkaagii?!." Waxay tiri: Ninna waan heli karaa, wiilna waan heli karaa, laakiin walaal -hooyo ma heli karo?!." Abbahay iyo hooyaday way dhinteen wax walaal kale, ii dhalana ma haysto, marka ina-hooyo waa uur habreed. Markaasaa ninkii intuu yaabay u wada daayey kulligood.

<u>Layli</u>:

1. Abbaanduulihii iyo colkii maxay u weerareen cidda?
2. Markii ciddii oo dhan la laayey yaa ka soo haray?
3. Naagtii maxay abbaanduulihii colka watey ku tiri?
4. Abbaanduulihii yuu u daayey naagtii?
5. Sheekadii bal soo koob oo qor.

# F A A L

Faalka iyo maryanadu waa tabo loola jeedo in lugu oogaado waxyaalo aan hubin.Faalku waa tiro midba in tahay oo laga tiriyo tusbaxa iyo quruuruxa. Waxaa kaloo jira xarriiqyo dhulka lugu xarriiqo. Maryanadu waa kuusha haweenka oo la weeraamiyo.

Waxaa la arkaa in qof cudur faalkiis la waayey ku dhaco. Waxaa kaloo la arkaa in loo doono nin u faaliya ama habar u maryanaysa. Inta badan faalka iyo maryanaduba waxay sheegaan wax qofka buka u roon. Maxay ku noqotay? Waxay ku noqotay faalka iyo maryanadaba qofka yaqaani waa ku xoogsadaa. Kolka haddii uu sheego wax qofka buka ka nixiyo, wuxuu ka baqaayaa inaan wax la siin.

Badanaa kuwa faaliya dadka wax u keensada oo been bay ku maaweeliya. Waxaa suurowda qofku inuu la buko cudur fudud oo qalid u baahan sida kolanta caloosha ku taal. Kolantu waxay ku siman tahay in qofka buka la jeexo oo laga gooyo oo uu durbaba biskoodo. Waxaa suurtowda in faalkiisu yiraahdo,qofka waxaa u dawa ah orgi cad oo afarta qoob madow oo inta fiidkii la qalo dhiigga iyo uuska la mariyo qofka. Waxaa la yiraahdaa nin buka boqol u taalisay.

Waxaa la arkaa in orgigii la helo oo dhiigiisa iyo uuska la mariyo.Isla kolkaas ,waxaa suurowda in qofka inta kolantii ku dillacdo naftu duurba ka baxdo. Haddii faaliyaha la weydiiyo waxa dhiiggii iyo uuskii wax u daweyn waayeen, waxaa

suuntowda inuu yiraahdo qofkii gawracay ayaa ahaa qof xun.

Bal u fiirsada oo maxaa isugu jira bugtada kolanta iyo orgiga cad oo qoobabka madow iyo xumaanta qofka orgiga gawracay.

Layli:

1. Haddii aad jirratid yaad daawo ugu tegi lahayd faaliyaaga mise dhakhtarka?
2. Faalka ma rumaysan lahayd wuxuu kuu sheego?
3. Dadka faaliyaa dhibaato maxay u geystaan xaasaska dadkeenna?

" Waa inaannu la dagaallannaa cadawyadeenna ee ah gaajo, cudur iyo aqoondarro. Waa inaannu sare u qaadnaa shaqadayada. Barwaaqada dhulkeenna taal waa inaannu la soo baxnaa. Danaheenna Tawriga ahi, waxay ina tusayaan sidii aynnu intaas oo idil ugu hawl geli lahayn. "......Jaalle Maxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaalida (21 Oktoobar 1971).

# KRISTOFAR KOLOMBO

K. Kolombo wuxuu ku dhashay magaalada Jenova ( Itaaliya), sannadku markuu ahaa 1451. Meeshaas ayuu ku koray oo wax ku bartay. Dabadeed baxri buu noqday. Wuxuu cilmiga badda iyo berrigaba ku dadaalo, markii dambe ayay la noqotay haddii uu ka dhoofo badda Atlantik inuu tegi karo dalka Hindiya, isaga oon meelna ku leexan. Sidaas daraaddeed dawladdiisii ayuu weydiistey inay ku kaalmeyso tijaabadaas.

Laakiin, nasiib darro, dawladdi way ka diiddey. Dabadeed wuxuu aaday waddanka Isbaanya oo ay deris ahaayeen, wuxuuna boqorka dalkaas u sheegay, hindisadiisii. Boqorkii wuu ka yeelay arrintiisii, wuxuuna siiyey 3 Doonyood, baxrina wuxuu uga dhigay dad maxaabiis ahaa oo denbiyo culculus galay.

Boqorkii Isbaanya,wuxuu ka ballan qaaday dadkii, haddii ay Hindiya tagaan oo ay ka soo noqdaan in denbiyadii uu ka cafi doono.

Sidaas ayay ku dhoofeen Kristoofar Kolombo iyo baxaartiisii. Dhib badan ka dib, ayay tageen 12 Oktoobar 1492 jasiiradda Guanahaani ( Ameerika), isaguse uu ku magacaabay San Salvador.

Kristoofar Kolombo markaas isaga waxay la ahayd,inuu gaaray Hindiya ( Aasiya).

Isla safarkaas wuxuu tegey Hayti iyo jasiiradda Kuba.

K. Kolombo iyo raggii la jirey, gadaal bay u soo noqdeen oo waxay yimaadeen dalkii Isbaanya,iyaga oo sida alaab badan oo waxa walba leh.

Boqorkii Isbaanishku aad buu ugu farxay Kolombo, maxaabiistiina denbigii waa laga wada cafiyey.

Dabadeed K. Kolombo dhawr jeer,ayuu ku noqday Ameerika oo dalal badan oo ku yaalla waxa ka mid ah Jamayka, Kolombiya iyo kuwo kale.

K; Kolombo wuxuu dhintay sannadku markuu ahaa 1506.

<u>Layli:</u>

1. K. Kolombo, safarkiisii ugu horreyey dalkee buu tegey taariikhdiise maxay ahayd waqtigaas?
2. Yaa kaalmaeyey Kolombo?, maxaase la siiyey?
3. Boqorkii muxuu u ballan qaaday baxridii?

## WARQAD ARDAY SAAXIIBKIIS U DIRAY

Arday ku nool magaalada Xamar oo la yiraahdo Jaamac Guuleed oo dhigta dugsiga hoose qaybta afraad, ayaa warqad u diray arday kale oo saaxiibkiis ah oo ku nool magaalada Baydhaba oo la yiraahdo Gacal Geeddi. Warqaaddiina sidan buu u qoray.

Jaamac Guuleed
Dugsiga Hoose ee Hodan
Muqdishow
15/ 5 / 1971

Saaxiibkayow,

Waxaan jeclaystay inaan mar labaad warqaddaan kuu soo qoro adiga oon middii hore ka soo jawaabin. Waxaan kaloo kuu sheegayaa inaan la kulmay hooyadaa oo i kaa waraysatay. Waxayna ii sheegtay inay kuu soo diri doonto wixii aad u baahan tahayba. Salaan iyo duco badanna way kuu soo dirtay, waxayne kugu la talisay inaad dadaashid oo aad wax baratid.

Saaxiibkayow, warqadaan markaad heshid waa inaad dhaqso ka soo jawaabtaa, waxaadna ii soo dirtaa buuggii aad iga qaadatay markii aan Xamar ku kulannay. Nabad gelyo.

Saaxiibkaa
Jaamac Guuleed

**Layli:**

Waxaad qortaa jawaabtii xaashada adoo iska yeelaya " Gacal Geeddi".

## DUURJOOGTA YAABKA LEH

Nuur wuxuu akhrisan jirey joornaallada cilmiga ah ee dabjoogta, iyo duurjoogta wax looga qoro. Joornaalku wuxuu wax ka qoraa bahallada, shinbiraha iyo halaqu sida ay ku nool yihiin iyo sida ay isaga celiyaan bahallada cadowga ku ah iyaga. Maalin baa Nuur sheekaan ka akhristay joornaalkaas.

Gerigu wuu ka adkaadaa libaaxa

Libaaxu hadduu doono inuu ugaarsado geri, dushiisa ayuu ku boodaa. Markaas ayuu ciddiyihiisa afka leh, dhabarka kaga qabsadaa. Gerigu markaas ayuu isna doonaa inuu iska rido. Sidee buu isaga ridaa?

Xeelad ayuu gerigu sameeyaa.

Gerigu orodka ayuu ku dheereystaa, isaga oo ku dhex ordaya meel geedo dhaadheer oo jiq ah. Geedaha laamahooda ayuu isaga reebaa libaaxa. Markaas ayaa laamuhu ka reebaan geriga libaaxii ku dheggana. Sidaas ayuu gerigu uga adkaadaa libaaxa oo naftiisa u bixiyaa!.

Shaqada iyo xannaanada shinbiraha

Waxaa jirta shinbir caqli badan. Shinbirtaas waxa lagu magacaabaa shinbir caqliley. Iyadu sida shimbiraha kale oo qurqurxoon cayaar waqtigeeda kuma lumiso.

Maalintoo idil, iyadu waxay u raadisaa cunto ilmaheeda. Afkeeda ayay shinbir caqlileydu ugu soo gurtaa ilmaheeda cayayaanka. Iyadu waxay awood u leedahay inay afkeeda ugu soo qaaddo ilmaheeda toban cayayaan. Sidaas ayay caqlileydu u quudisaa ilmaheeda aan weli baran duulidda.

Layli:

1. Nuur muxuu akhrisan jirey?
2. Sheekadii Nuur ka akhristay joornaalka ee ku saabsanayd geriga iyo libaaxa bal wax ka sheeg.
3. Dugaaggu sida uu wax isaga celiyo bal wax ka sheeg.

## SADDEX DIBI IYO LIBAAX

Waa baa meel waxaa wada joogey saddex dibi iyo libaax. Saddexda dibi mid waa caddaa, midna waa guduudnaa, midna waa madoobaa. Dibidu aad bay u xoog badnaayeen, geeso fiiqfiiqan oo sida waranka wax u mudana way ku yaaleen. Iyagu waxay heshiis ku ahaayeen inay isu hiilliyaan haddii cadow uu ku yimaado.

Ayaantii dambe, ayaa libaaxii gaajooday kuna dhici kari waayey inuu mid ka cuno dibida. Libaaxii aad buu u fakarey. Wuxuu goostay inuu dhagro dibida, si uu u gaajo beelo. Libaaxii wuxuu yimid dibigii madoobaa iyo kii guduudnaa, wuxuu ku yiri: " Ma og tihiin dibiga caddi, inuu idin ka faanay oo igu yiri, anigu labadaas dibi la joogistoodu waa i dhibaysaa, maxa yeelay, anigu waa ka qurxoon ahay.!!"

Labadii dibi waa ka caroodeen saxiibkoodii caddaa. Markaas baa libaaxii u soo jeediyey labadii dibi talo, wuxuuna ku yiri: " Idinku berri ha la daaqina dibigaas oo ka fogaada, aniguna waxaan dhegeysan doonaa, bal hadba, wuxuu idin ka sheego". Waaberigii ayaa labadii dibi aayar ay ka fogaadeen meeshii u daaqayey dibigii caddaa.

Dabadeed libaaxii [illegible] ku helay dibigii cadd[illegible] [illegible] dilay, cunayna.

Barqadii ayaa libaaxii u yimid labadii dibi, wuxuuna ku yiri: " i dhegeysta, dibigii caddaa waa tagey, wuxuuna ii sheegay inuu doonanayo dibi kale oo midabkiisa leh, maxa yeelay, wuxuu yiri, " Anigu dibidaas foolxumada badan leh lama joogi karo".

Dhowr maalmood ka dib, ayaa libaaxii gaajooday, wuxuuna jecleystey inuu cuno labada dibi midkood,

illowse wuxuu arkay inuu labadooda oo wada jira uunan la dagaallami karin. Markaas buu u yimid dibigii madoobaa, wuxuu ku yiri: " Adigu war ma qabtid, ma og tahay,inuu dibigii guduudnaa uu kaa faanay uu yiri ma jecli inuu i feer daaqo bidiga madow, maxa yeelay, madowgiisa ayaan nacay". Markaasa libaaxii u sheegay si uu u rumeysto wuxuu ku yiri, " Bal xoogaa berri ka fogow,waxaad ogaan doontaa wuxuu falo e". Waagii markii uu baryey ayaa dibigii madoobaa taladii libaaxayeelay oo ka dheeraaday dibigii guuduudnaa. Markaas ayaa libaaxii intuu soo gaatamay, ku boodey dibigii guduudnaa. Markaasuu markiiba diley.Maalmo ka dib ayaa libaaxii u yimid dibigii madoobaa oona ku jeesjeesay, wuxuuna ku yiri, " Ma og tahay inaan maanta qado kaa dhiganayo". Markaasuu dibigii madooba gartay in libaaxu saaxibbadiis diley. Dibigii wuxuu ku jawaabay, " Anigu ayaantii aad dishey dibigii caddaa baan dhintay, nolosha hadda aan noolahayna waa mid dhalanteed ah". Libaaxii intuu ka carooday,ayuu ku soo boodey oo diley. Wadajirku waa xoog, kala tagguna waa tabar darro.

Layli:

1. Libaaxii saddexdii dibi sidee buu u kala siray?
2. Sheekadaan maxay murti leedahay?
3. Dibedi hadday wada jiraan libaaxu ma ku dhiirran lahaa iyaga?
4. Bal ka faallood maahmaahdan" Ilko wadajir bay wax ku gooyaan!"

""".... Iskaashiga, wadajirka iyo xoogsigu waxa weeye hubka inoo soo jiidaya ciribdanbayd adag iyo horuukac wacan.

"--- Jalle Moxammad Siyaad Barre,Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya ( 22 Mey 1971).

## AFRIKAAY HURUDDOY

Hooheey Afrikay huruddooy
cadow ku heeryey huruddooy
halyeyadaadii huruddooy
haad baa cunaayee huruddooy
haamaa la saaraa huraddooy
hayin sidiisaa huruddooy
la hogaaminaayaa
dulli lama hullaabtee
aaway hanadadaadii?
doqon baa haboowsanoo
weligeed hallawsane
sidii xoolihiibaa
xero nalagu hoyiyaa
horor weeraraa huruddooy
waaxyaha ku haystoo huruddooy
oo hantidaadii huruddooy
ka hirqanaayee huruddooy
hadina weydey huruddooy
had maad ogaanoo huruddooy
aad hagaagi doontaa?
dulli lama hillabtee
aaway hanadaddadaadii?
habeynna badan baan huruddooy
hamuun ku ssexday huruddooy
hiirtaanyo awgeed huruddooy
la hadli wayee huruddooy
caanihii hashaydaan huruddooy
haleeli wayoo huruddooy
la iga hor jooga
dulli lama hillabtee
aaway handadaadii?

(Ismaaciil Xirsi)

Layli:

1. Heestaan si wanaagsan korka uga baro.

...."Innagu maanu nasan doonno intii dadka Afrikaanka ahi, uu ka xoroobo gumeysiga, midab gumeysiga iyo xoogga imberiyaalistaha." Jaalle Maxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya - (1 Nowembar 1971).

## XAASKA WANAAGIISA

Dadyowga adduunyada ku nool oo dhami waxay ka bilawdeen xaas, maxaa yeelay, xaasku waa dhismada kowaad oo nolosha wadajirka. Xaasku wuxuu ka bilowdaa nin iyo naag is guursaday iyo carruurtood.

Xaasas badanina, waxay noqdaan degmo degmoyin, degmooyinkuna waxay noqdaan dal. Dadkii dal yeeshana, wuxuu noqdaa qaran. Qarankunna wuxuu ka abuurmaa dhul, iyo dad isku mid ka ah dhinaca hiddaha, murtida iyo diinta.

Waxaa jira xaas xun iyo xaas wanaagsan. Xaasku wanaagsani waa kan leh hooyo iyo aabbe wacan. Hooyada iyo aabbuhu, waa kuwa keliya oo wanaajin kara ama xumayn kara reerka noloshiisa.

Reera aabbihiis waa kan had iyo jeer ka shaqeeya siduu ku toosin lahaa reerka noloshiisa, siduu wax ku bari lahaa carrurtiisa iyo siduu uga dhigi lahaa xubin nool oo dadka iyo dalka wax u tarta.

Ninku inuu xannaaneeyo xaaskiisa waxay ku tahay waajib.

Xaaska hooyadiisa waxaa laga rabaa, inay reerka gudihiisa ka shaqayso, guriga nadaafadiisa iyo carruurta barbaarintoodana qayb weyn ka qaadato.

Labada qof oo is qabta kii reerka ku cayaara, hadduu nin yahay waxaa la yiraahdaa: xilagube, hadduu naag yahayna waa debabley.

Ninkii reerka dhismihiisa ku wanaagsan dadku wuu xurmeeyaa, haweeneydii reerkeeda dhaqatana waxaa la yiraahdaa gaari. Carruurtii aabbe iyo hooyo wacan leh, ayaa aaydhoodu wanaagsannadaan.

<u>Layli</u>:

1. Reerku yuu ka koobmaa?
2. Reerku marka hore see buu ku dhismaa?
3. Reerka aabbihiis xun yahay maxaa la yiraahdaa?

Eraya ku dar hadalladan: guur. gaari, xilagub, debabley, barbaarin, qaran, dal, dad.

## GURIGA HIDDAHA

Dal kasta wuxuu leeyahay dhaqan iyo taariikh u gaar ah dadka dalkaas deggan, taas oo ah dhaxalkii facyaalihii hore uga tageen. Dadkii aan dhaqankaas iyo taariikhdaas xannanayn, waa dhaxal guuraan. Sidaas aawadeed dadka dhaliinta yar oo soo barbaaraya waa in la baraa sheekada iyo hiddaha dalkooda. Xusuusta dhaqanka dalka Soomaaliyeed ,waa kuwa qodda dheer oo qof kasta oo Soomaali ahi ku faani karo. Dhaqanka dadku wuxuu ka kooban yahay afka uu ku hadlo, dharka uu qaato, alaabtuu ku dhaqmo. Soortuu cuno, farsamada, xikmadda iyo waxyaalo kaloo badan ee nafta dadkaasi ku xiran tahay.

Dad walba waxa la gudboon waxyaalahaas gundhigga u ah dhaqankooda iyo hiddahooda inay bartaan oo dhawraan, si ayan u dhaxal wareegin.

Magaalada Xamar waxaa ku yaal guri lagu xannaneeyo dhaqanka iyo xusuusta dadka Soomaaliyeed. Gurigaasi wa kan u dhaw xafiiska hawlaha magaalada laga maamulo " Munushiibiyo". Alaabta dadka Soomaalidu ku dhaqanto, badankeed baa gurigaas dawladdu ku uruurisay, si ayan u lumin oo loo hilmaamin. In qof walba alaabtaas soo daawado waa lama huraan, si uu ku aqoonsado dhaqanka dalkiisa. Laakiin alaabtaasi wada koobi mayso, waxa dadka Soomaaliyeed oo dhan ku dhaqmo. Meeshaas waxaa la dhigay alaab, ay ka mid tahay: dhar, hub, alaab guri, bir wax lagu gooyo, weelasha xoolaha lagu waraabiyo, alaabta doonyaha iyo shabaagta

kalluunka lagu jallaabto, dahab iyo lacagtii hore iyo boqollaal waxyaalood oo kala duwan. Waxaa kaloo yaal xaashiyo ka sheekaynaya taariikhda dadka Soomaaliyeed boqollaal sannadood oo la soo dhaafay.

Layli:

1. Dadka Soomaalidu muxuu hiddo u leeyahay?
2. Guriga hidduhu muxuu waxtarmo u leeyahay dalkeenna?
3. Alaabta hiddaha qoladii lumisa, maxaa ku dhaca?
4. Gumeysigu muxuu ka yeelay hiddaha dalkeenna?

* * * * * * * * * * *

"""... Ma aha inaannu halmaanno taariikhdii geesiyaasheennii u huray naftooda xornimada iyo gobonnimada dalkeenna. " Jaalle Moxammad Siyaad Barre Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ( 26 Juun 1970).

QAWLADDA GANACSIGA

Qawladda ganacsiga waxay la mid tahay furihii dhaqaalaha dalkeenna. Iyadu waxay waxtar u leedahay horukaca dhaqaalaha dalkeenna. Qawladdu waxay ganacsiga dalkeenna ku xirtaa dunida oo dhan. Iyadu waxay maamushaa wixii aannu dunida ka soo iibsanaynno iyo wixii aannu u dhoofinaynno. Teer iyo intii la unkay qawladda ganacsiga, iyadu waxay u horseedeysey alaabta dhulkeenna ka baxda.

Qawladda ganacsigu, waxay isku xirtaa shaqada warshadaha oo kala duwan, sidii dhaqaalaha dalkeennu uu u xoogoobi lahaa. Arrimo dhibaato badan, ee dhinaca dhaqaalaha ka qabsaday dalkeenna, ayay qawladdu wax ka qabatay. Dhulka soo korayaa ganacsigoodu meel fog gaari maayo, haddii ayan lahayn qawlado u horseeda ganacdooda.

Oktoobar 21, markii Tawraddu ka dhalatay dhulkeenna, maamulka qawladda ganacsiga wax weyn ayaa iska beddelay. Guddiyaalo badan ee u raadiya suuq waxa ka baxa dalkeenna, ayay qawladdu u dirtay dibedda. Xukuumadda Tawriga ahi, waxay u dejisey qawladda ganacsiga sharciyo iyo xeerar adadag, sidii maamulkeedu ku hagaagi lahaa. Qawladda Ganacsiga waxa loo dhisay daar qurux badan ee ku habboon shaqadeeda iyo maamulkeeda.

Daartaasi hawlihii qawladda ayay horuumarisay. Dalkeennu maalinba maalintii ka danbaysa, wuxuu ka qaadayaa tallaabooyin dhinaca dhaqaalaha,ganacsiga, beeraha iyo farsamadaba. Sidaas daraaddeed, ayaa qawladdu ganacsiga hawsheedu u badanaysaa maalinba maalinta ka danbaysa. Qawladdu mar la arko, waxay ku dadaalaysaa sidii ay suuqyo cuscusub ugu heli

lahayd dalkeenna wixii ka baxa iyo wixii laga farsameeyo. Qawladda ganacsiga waxay ka qayb gashay shirar iyo bandhigyo waaweyn oo kala jaad ah ee lagu dhigay Yurub, dalalka Carbeed iyo meela kaloo badan. Meelahaas bandhigyada lagu qabtay, qawladdu waxay u soo bandhigtay dawladahaas alaabta ka baxda dhulkeenna iyo waxa laga farsameeyo. Qawladda ganacsigu, waxay u tahay dhulkeenna khalfaddii uu ka eegi lahaa shisheeyuhu waxa dhulkeenna ka baxa, iyo tallaabooyinkii ka qaaday dhinaca farsamada,, beeraha, qorshayntaiyo warshadaha. Taas keliya ma ahee, qawladdu waxay ino tusaysaa sidii aannu ugu mintidi lahayn wixii dalkeenna ka soo baxa.

Layli:

1. Qawladda ganacsigu maxay u tartaa dhulka dhaqaalihiisa?
2. Bandhigyada ay ka qayb gashay qawladda ganacsiga, bal wax ka sheeg?
3. Qawladda ganacsigu maxay u tahay dhulkayaga?
4. Maxaa la gudboon dawladaha soo koraya?

* * * * * * * * * * * * *

"""... Haddii aynnu doonaynno inaan barwaaqo gaarno, waa inaannu diyaar u ahaannaa, una dulqaadanna dhibaatada iyo shaqada culus. "--- Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya ( 16 Juunyo 1970)/

## XIRIIRYEYAALKA HADALKA

Af Soomaaligu wuxuu u qaybsamaa tixo wadasocda. Tixahaas waxaa isku xira xarfahaan: oo, ee, na, ba, iyo, ka dib, ama.

1. Bankigaan aadayaa oo lacag ka doonaya
2. Waan soo noqnayaa ee i sug.
3. Haddad kaas wax siisey kan na wax sii.
4. Oday kastaba wiilkiisu waa u diric.
5. Hanad iyo Hodan waa isku fac.
6. Markaan qadeeyo ka dib shaqaan ku noqdaa.
7. Beydan ama xareedo baa ku filan hawsha.

Layli:

Qor 12 tixood oo ay ku jiraan xiriiriyada hadalka.

## U HALGANKA GOBANNIMADA

Halganka gobannimadu waa sheeko dheer oo aan lagu koobi karin cashar keliya, laakinse waxaan ka sheegeynnaa in yar oo kooban.

Waagii hore Soomaalidu iyadaa isu talin jirtey hase yeeshee dawladnimada iyo taliska xoogga leh, waxay ka bilaabatay waagii Axmed Gurey oo ku aaddan qarnigii 15 -naad.

Markii gumeysiga Yurub Afrika soo galay, ayaa Soomaalida la kala qaybiyey, taas oo ka dhignayd, xeerka gumeysiga oo loo yaqaan kala qaybi oo u tali. Muddo badan baa Soomaalidu gumeysi ku jirtey. Inkastoo gumeysi ay ku jirtey, Soomaalidu waxay lahayd xeer iyo xaamis ay isku xukumi jirtey.

Dagaalkii labaad oo adduunka, ayaa dalka Soomaaliya gebi ahaan galay taliska Ingiriiska. Sanooyin yar ka dib, waxaa Soomaaliya laga furay xisbiyaal badan. Qaarkood gobannimadoon bay ahaayeen, qaarka kalena gumeysigaa maamulayey. Intii gobannimadoonka ahayd oo dhan, waxay isu geysteen hiil iyo hoo intii kartidoodu ahayd.

Cadawgii Soomaaliya waa kari waayey, inuu joojiyo xooggii waddaniga ahaa ee Soomaaliyeed intii laga gaaro gobannimo buuxda. Gobannimadu dheeldheel kuma dhalan oo dhib weyn baa loo soo maray. Dad badan oo Soomaali ah baa u dhintay, kuwo badanna maalkoodii bay u hureen, kuwana xarig dheer bay ku muteen.

In kastoo gobannimo la helay, haddana nin walba oo Soomaali ah, waxaa laga doonayaa inuu xil weyn isa saaro, dadaal badanna la yimaado. Qof kasto oo waddani ah, hawsha dalka kama daalo oo maalin kastaba xiisa hor leh buu la yimaadaa.

Waxaala yiri:" Nin kasto oo dhaqan nin baa u dhoobeysan". Ulajeedada waxaa weeye;" Haddii carruurta iyo dadka waayeelka ah dhaqan yihiin, dadka xoogga leh waa in ay dhoobo lahaadaan. Waa in ay shaqeeyaan si dadkooda noloshiisu u wanaagsanaato.

Layli:

1. Shegg Soomaaliya waxay ahayd qarnigii 15 -naad?
2. Maxaa qaybiyey Soomaalidii wada jirtey gumeysiga hortiisa?
3. Ka sheekee xisbiyaashii Soomaaliya ka furnaan jirey 1950 ka hor.

TIXO KU DAR ERAYADAN: xeer. kala qaybis.hiil iyo hoo.

* * * * * * * * * *

"""... Siyaasaddayadu waxa weeye in dadkeennu is xukumo ee uu isu hoggaamiyo horukaca.

"--- Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya ( 9 Oktoobar 1970).

# B O O S T A D A

Boostadu waa qaadidda iyo keenidda warqadaha dadku qoraan, dal kasta ha joogeene. Sida telefoonka iyo wargeyska ayaa boostadu door weyn ka cayaartaa warfaafinta dunida maanta. Telefoonka iyo siinka war kooban ee aan badnayn baa lagu diraa, wayna qiima badan yihiin. Intii eray oo aad ku hadasho ama muddadii aad hadasho intay tahay baad lacagteeda bixisaa. Haddaad 5 daqiiqadood telefoonka kula hadashid qof Kismaanyo jooga 20 shilin baad bixisaa. Sidaas darteed, warfaafinta telefoonka iyo siinku waa qaali, maxaa yeelay, dawladdu alaabtaas samaynteeda lacag badan bay ku bixisaa.

Boostada warqadaha iyo xirmooyinka yaryar baa lagu dirsadaa, lacag aan badnaynna waa la baxiyaa. Waxaad guudka kaga qori kartaa in ka badan intaad telefoonka ama siinka ku sheegto. Haddaad doonayso inaad warqad u dirtid qof jooga - shanta qaaradood middood adoo jooga Xamar lacag yar ayay boostadu kaa qaadanaysaa.

Sidaas darteed, qiimaha boostadu warqadda ku qaaddo, wax badan buu ka jaban yahay kan telefoonka iyo siinka lagu bixiyo. Inkastaba, boostadu warqadaha qaadiddooda iyo keeniddooda way la raagtaa.

Boostada qaadiddeeda waxaa u dhigan xeer ka dhaxeeya dawladaha.

Sidaas waxaa ku jirto dal kasta dantiisa, maxaa yeelay, waa la kala war helaa, kala macaashka iyo aqoontuna way ku fidaan. Sidaas darteed, boostadu xad kasta way ka tallaabtaa oo gaadiidka adduunka oo dhan baa gura.

Qofkii raba inuu warqad boostada ku diro, waa inuu xusuusto xeerka boostada u dhigan ee madhaafanka ah. Xeerkaasi waa in la muujiyo:

1. Magaca qofka loo dirayo warqadda iyo meeshuu ku sugan yahay,
2. Magaca qofka diraya warqadda iyo meeshuu ku sugan yahay. Tilmaanta hore waa in lagu qoro baqshadda boggeeda sare, tilmaanta dambena waa in lagu qoro baqshadda boggeeda hoose. Waa inay dhigmadu aad u muuqato si loo garto.

Labadaas tilmaanood la'aantood, boostadu ma ogaan karto qofkay u socoto iyo kay ka socoto warqaddu. Taasoo kale waxa la yiraahdaa ( warqad dhegala').

Qodobka saddexaad waa in warqadda tigidh lagu dhejiyo. Taasoo ah astaanta muujinaysa inuu baxiyey kiradii boostadu warqadda ku qaadi lahayd culayskeeda. Haddii qofkaad warqadda u dirtay kuu soo jawaabo, boostadu gurigaaga bay jawaabta kuugu keenaysaa ama sanduuqaaga bay kuugu ridaysaa. Sidaas darteed, boostadu hawl lama huraan ah ayay dadka u qabataa oo waa xubin ka mid ah laamaha warfaafinta ee adduunka.

<u>Layli:</u>

1. <u>Erayadan hadal u gaar ah ku dar.</u>

boosto, telefoon, taar, qarli, hawlahaas, ilbaxnimo.

2. Erayadaan tixo ka dhig. ( warqad boosto) lacag badan)

## MINGIS IYO WADAADDO

Sida faalka iyo maryanada waxyaalaha beenta ah oo dadka lugu dago, waxaa ka mid ah Mingiska iyo Wadaaddada. Mingiska dadka waa loo cayaaraa wadaaddadana foox ayaa loo shidaa oo la udgiyaa. Ha ahaatee, haddii qofka buka aan wax laga qaadan ee loo cayaaro ama la udgiyo waxba kuma jabnaadeen. Waxyeellada weyni waa qofkii bukey oo la dhaco, cayaarana lugu biskayn waayo.

Kolka waxaa dhacda in naag uu qabo nin aan wax haysan, ama ku duukaan yar ama makhaayad leh bukooto. Waxaa dhacda in habari u timaaddo. Inay tiraahdo naa mingis ayaa ku haya. Mingisku wuxuu rabaa in lugu cayaaro dhawr kun oo shilin. Waxay u dhowdahay inaan ninka lacagtiisuba gaarin inta habartu sheegtay. Waxaa in badan dhacda in naagtu tiraahdo haddii aadan mingiska iga tumin ima jeclid.

Arrintu kolka ay halkaas marayso, laba ayay mid neqotaa, Inuu ninkuu wixii uu haystay bixiyo oo uu cayroobo oo uu dabadeed naagta iyo carruurta wuxuu siiyo waayo. Waxaa wehelisa inaan naagtiiba biskoon, maxaa yeelay, mingisku cudur jira ma aha. Tan kale waa inuu ninku diidaa inuu lacagta bixiyo. Waxaa ku xigta in naagtii bugtey carooto oo ay reerka ka tagto oo carruurtii rajiso. Halkaas ninkii waxaa ku dhacday laba daran mid doora.

Dhammaanteen waxaa ina la gudboon inaynnu beeninno oo la dagaallanno mingiska, wadaaddada, booranaha iyo wixii aan jirin oo dhan oo laysku siro.

Layli:

1. Mingiska iyo wadaaddada ma rumaysan tahay?
2. Haddii aad jiraatid, mingis iyo wadaaddo in lagu cayaaro ma oggolaan lahayd?

## RAAGE UGAS

Raage Ugas, wuxuu ahaa gabayaa caan ku ah dalka Soomaaliyeed. Nin kasta oo gabayaa ahi. Raage Ugaas libin ayuu u oggolaa oo wuu ku tix gelin jircy gabaygiisa. Raage, wuxuu ahaa nin abuurta aad u jecel, haweenka qurxaha badanna caashaqa. Isaga dhibaatooyin ayaa ka qabsaday nolosha. Gabayada Raage waxay leeyihiin murti adag oo qiimo leh. Calaacal iyo silic ayuu wax badan an hoolaa gabayaagu. Fardaha naqa, roobka dabaysha haweenka, intaas oo dhammi Raage waxay gelin jireen dareen. Gabaygani wuxuu ku saabsan yahay ammaan fardood. Isaga oo sifaynaya faraskiisa wuxuu yiri:-

Walhadow faraskaygu
Weedh yaroon ku ammaanay
Bal aan wawga ka sheego
Gammaan waa kala waare
Weedhaanshow oradkiisu
Wadhaf deyr laga xooriyo
Taarka layska war qaadiyo
Ma wayeenta shukaantoo
Wanaag loogu qab-taa
Werisow midabkiisu
Cirka oo wadhanaaya oo
Wahabkii laga qaadiyo
Wadiiqo an caddaaniyo
Ma waagoo sagliyaa
Weydaarow qafalkiisu
Isagoon wada laasan
Ninkii haanta ka waabsha

Wiciirtii yaryaraayd iyo
Waayeelka rugta joogiyo
Wiriiruu ku dilaaye
Wiyil qoodha miyaa
Dadka oo wada seexday
Haddaan laanta ka weecsho
Waddankaan ku shakaalay
Ma weydaaran yaqaane
Ma wanaagsan gabdhoodoo
Weli kuu mehershoo
Wareegaysa dushaadoo
Wixii aad ku lahaydiyo
Waanadii maqashaa.

Layli:

1. Raage Ugaas gabayadiisa kale wax ma ka taqaannaa?
2. Gabayada Raage waa jaadkee?
3. Muxuu haweenka u jeclaa?
4. Waxyaalaha kale ee Raage jeclaa wax ka sheeg?

WARSHADDA DHARKA

Warshadda Dharku waxay ku taallaa magaalada Balcad, waxaana la dhisay 1966. Warshadda dharku waxay samaysaa kaaki, maraykaan, bafto, marbuuc iyo dhar kale oo midabyo kala duwan leh. Warshadda dharku waxay ka mid tahay warshadda Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya oo waaweyn. Warshaddaas waxaa ka shaqeeya 750 qof oo shaqaale ah iyo injiyeerro Soomaali ah oo aqoon u leh sida dharka loo sameeyo warshadda dharku waxay wax ka daweysey dhibaatada dadka Soomaalida ka haysatey shaqo la'aanta. Warshadda dharku waxay ku taallaa webi Shabeelle agtiisa. Shaqaaluhu meel u dhow,ayuu deggan yahay warshadda.

Cudbiga dalkeenna ka baxa oo idil waxa la geeyaa warshadda dharka. Warshaddu beeraleyda waxay ka iibsataa cudbigooga. Cudbiga markii la hufo,ayaa ka dib la miiqaa.

21 Oktoobar 1969 markii Tawradda ka dhacday dhulkeenna ka dib, waxyaalo badan ayaa iska beddelay warshadda dharka. Tawradu waxay kor u qaadday nolosha shaqaalaha iyo warshadda maamulkeeda. Warshadda dharka waxa lagu tiriyaa inay ka mid tahay warshadaha dalka Soomaaliyeed ugu waaweyn. Wixii ka soo baxa warshadda dharka waxa loogu isticmaalaa baahida gudaha. Reer miyigeennu wuxuu dharka ka qaataa warshadda dharka. 1971 warshaddu waxay soo saartay 6 malyuun oo yaardi ee dhar ah. Warshadda dharku waxay ka qayb gashay horukaca dalkeenna.Iyadu waxay dharka u dirtaa wakaaladaha ganacda ee dawladda. Wakaaladaha ganacdu waxay u kala

DIRAAN DHARKA WARSHADDU SOO SAARTO GOBOLLADA iyo degmooyinka Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya. Dawladda Tawriga ahi, waxay ku talo jirtaa in warshadda dharka la sii wanaajiyo oo la sii cusboonaysiiyo si hawsheeda ay si wacan ugu gudato iyo sidii aan uga kaaftoomi lahayn dharka aan dibadda uga soo aroorsanaynno.

Shaqaalaha iyo injiyeerrada Soomaaliyeed ee ka shaqeeya warshadda dharka, waxay yihiin lafdhabartii horukaca dhaqaalaha dalkeenna.

Layli:

1. Warshadda dharku xaggee ku taalla, goormaase la dhisay?
2. Shaqaalaha ka shaqeeya warshadda dharka tiradiisu waa immisaa?
3. Cudbiga maxaa laga sameeyaa?
4. 1971 warshadda dharku immisa milyuun oo yaardi soo saartay?

* * * * * * * * * * * * *

"""... Dhulkayagu dhibaato wuu ka gudbi karaa, haddii aynnu u shaqaynno si aad ah. Haddii aynnu ka sugno kaalmo dadad kale, innagu marna noolaan maynno. Isku kalsamidu waxay inoo tahay hadaf iyo astaan. "--- Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya ( 13 Oktoobar 1971).

## JIDADKA IYO WADDOOYINKA

Jidadku waa halbowlayaasha dhulka gobolladiisa iyo degmooyinkiisa isku wada xira. Jidadka iyo waddooyinku waa halbowlayaasha jirka dadka ku jira oo kale. Baabuuradda iyo gaadiidka dhulku waxay ku ordaan jidadkaas iyo waddooyinkaas.

Gaadiidku wuxuu qaadaa badeecada iyo dadka, iyaga oo maraya jidadkaas loo sameeyay. Jidadka dalkeenna ku yaallaa ma aha, jidad gudan kara waxa laga doonayo. Dalkeenna jidadka ku yaalla ma dhisna, laamina ma leh badi. Sidaas daraaddeed ganacsigu, mushtarku, horay weli umay kicin. Taasina waxay ka timid dadka iyo dalka dhibaatada ka haysata jidad la'aanta. Dhaqaalaha Soomaalida waxaa curyaamiyey gobollada iyo degmooyinka aan isaga xirnayn dhinaca ganacsiga. Jidadka iyo wadooyinka mara dalkeenna, waxay leeyihiin carro, dhagaxyo iyo bus u keenaya dhibaatooyin gaadiidka. Woqooyiga Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya wixii ka soo baxa ma yimaadaan koofurka Jamhuuriyadda Koofurka wixii ka soo baxana ma tagaan Woqooyiga. Gobol walba wuxuu u xiran yahay gooni, maxaa yeelay jidadkii isku wada xiri lahaa dalka waaxyihiisa oo dhan, weli ma samaysna. Haddii jidad suubbani ay jiri lahaayeen, gobollada dalkeennu way is taageeri lahaayeen. Gobolka Boosaasood, timir iyo kalluun wuxuu siin lahaa gobollada kale. Labada Jubbana waxay siin lahaayeen miro, khudrad Woqooyiga.

Jidadka iyo waddooyinka suubbani, waxay ka furtaan dhulka dhibo badan. Dhibahaas waxa ka mid ah:

a) kala warqabid la'aan aan dadku iska war qabin.
b) gaadiid xumaan
d) wargeys la'aan

e) badeeca basta ama duqowda

f) boosta la'aan.

1969 Oktoobar, markii ay ka dhalatay Tawraddu dalkeenna waxyaalo ayaa iska beddeley jidadka iyo waddooyinka hagaajintooda. Dawladda Tawriga ahi, waxay ku dadaalaysaa sidii ay u dhisi lahayd jidad iyo waddooyin suubban oo isku xira gobollada iyo degmooyinka dalkeenna oo idil. Dawladda Tawriga ahi, waxay hagaajin doontaa jidadka iyo waddooyinka. Jidadkaas waxa laga bilaabayaa Beled Weyne teer intii Garoowe iyo Burco. Markii jidadkaasi dhammaadaan, waxa la filayaa dhaqaalaha dalku inuu is beddelo.

Layli:

1. Jidadku dhaqaalaha horumarkiisa maxay ka qabtaan?
2. Dhibaatooyinka jidad la'aanta ka imaan kara wax ka sheeg.
3. Jidadku waa halbowlihii dalka oo kale maxaa loo yiri?
4. Haddaan jidadku isku xireen gobollada iyo degmooyinka maxaa dadka ku dhici lahaa?

* * * * * * * * * * * *

"""... Iskaashiga, wadajirka iyo xoogsigu waxa weeye hubka inoo soo jiidaya ciribdanbayd adag iyo horukac wacan. "—— Jaalle Moxammad Siyaad Baare, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya ( 27 Juun 1971).

## QODBAHA MAGACYADA LAB

Qodbaha magacyada lab waxay gadaal ka raacaan magacyada lab, waana kuwaan:

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| ka | ku | kii | ga | gu | gii |
| ha | ha | hii | a | u | ii |

Ninka dheer waa xoog badan yahay.
Miisku ma qori baa mase waa bir?
Wiilkii wanaagsanaa baa yimid.
Ha ku fadhiisan kursiga jaban.
Layligu waa dhib badan yahay.
Gugii dhoweyd roob badan baa dàay
Furaha iigu dhiib Cambaro.
Ciddiyuhu ma jarpa.
Cidihii weli nooma imaan.
Gòa xamooradeysani baftada ahi ka wanaagsan kan marbuucda
Madaxu timo ma leh.
Sicii dhalay weysha cad, dhurwaa baa cunay.

Layli:

Qor 12 tixood oo ay ku jiraan qodbaha macayada lab, jaad kastaba.

GULYELMO MARKOONI

G. Markooni wuxuu ku dhashay magaalada Bolonya ( Italiya) sannadku markuu ahaa 1874. Markii uu aad ugu yeeshay aqoonta cilmiga fiisiga ayuu wuxuu hindisey inuu diro taar silig la'aan, taasina waxay ahayd markii ugu horreysey adduunyada, taariikhduna waxay ahayd 1895.

1901 wuxuu awoodey inuu taarkiisu gudbo badweynta Atlantik. 1904 G. Markooni, wuxuu haddana hindisay Radiyaha wartebinta isaga oo u yeelay valvolo.

Sannadku markuu ahaa 1909 G. Markooni, waxaa abaal loo siiyey billad sharaf ee adduunka loo yaqan " Billad Noble".

G. Markooni waddankiisa waxaa loogu doortay inuu noqdo senator 1914, hadana wuxuu gudeonshe ka noqday guddiga wax baarista cilmiga fiisiga ee waddankiisa ( 1928).

1916 G. Markooni wuxuu ku beegay raadiyaha, hirarka hawada ku socda, ha ahaadee kuwa gaagaaban ama kuwa kaleba. G.Markooni wuxuu dhintay 1937.

Hindisihii Markooni waxtar weyn bay u yeeshay dadka adduunyada ku nool. Teer iyo maantada la joogo waxtar weyn ayuu dadku ka kororsaday hindisihiisii. Waxaa nala gudboon inaan aqoonsanno qofkii sidaas oo kale waxtarkiisa dunida iyo dadnimada ugu muujiyo. Sidaas ayaa magacii G. Markooni ku waaray.

Layli:

1. G. Markooni muxuu hindisey?
2. G. Markooni maxaa abaal loo siiyey?
3. G. Markooni goormuu dhintay?

## HAWL IYO HANTIWADAAGNNIMO

Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga ahi maxay u doorataay hawl iyo hantiwadaagnnimo?.
Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga ahi, waxay u doorataay hawl iyo hantiwadaagnnimo waxa weeye ,in hawshu ay tahay middii keliya oo horukac lagu gaari karo, hantiwadaagnnimaduna ay hannaanka keliya tahay oo lagu gaari karo sinnaan, midnimo, caaddilnnimo, demokrasiya iyo shaqo dadku ka wada siman yahay. Hawsha iyo hantiwadaagnnimadu waxay u soo jiidaysaa dadkeenna iyo dalkeennaba dhaqaale, dhaqan iyo aqoon sarreeya.

Hawl iyo hantiwadaaggu waxay inoo keenayaan gaddoon weyn ee ku saabsan dhinaca beeraha, farsamada, hawsha, dhaqaalaha, teknooloojiga iyo caaddilnimo . Hantiwadaagnnimadu waa hannaanka keliya oo inoo ka- faala qaadi kara inaan ilbaxnnimo xoog leh dhulkeenna ka dhisanno oo aan ka baxno gacanta gumeysiga cusub iyo imberiyaalisnnimada. Hantiwadaagnnimo iyo hawl qabsiga iyo isku kalsoonaantu, waxay dhiirri gelinayaan dadkeennu inuu wax qabsado oo ilbaxnnimo adag dhisto. Tawraddii 1969, waxay ina tustay waddada keliya oo aan horukac ku gaari karnaa, inay tahay" <u>Iskaa wax u qabso</u>".

Hawl iyo hantiwadaagnnimadu waa hannaankii ugu danbeeyay hannaanyada nolosha eerdgdkuddegdeg horay ugu kici karo. Hawl iyo hantiwadaag waxay ka soo hor jeeddaa gumeysiga iyo gumeysiga cusub iyo xoogga imberiyaalistaha iyo midab kala sooca, qabiilnnimada, afmiinshaarnnimada, iyo liididda shaqaalaha lafdhabarta u ah horuca dalkeenna iyo

dadkeenna. Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Guddoonshaha Guddiga Sare ee Tawraddu, wuxuu yiri maruu arrintaas ka hadlayey, "----- Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya marna ka ay weecanmayso waddada hantiwadaagnimada cilmiga ku dhisan ee ay dooratay. Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya waxay ku socon doontaa siyaasada kalsoonaanta siinaysa shaqaalaha dadkeenna, shaqaalahaas oo ah lafdhabarkii Tawraddii Oktoobar 1969".

Layli:

1. Hantiwadaagnimo maxaa la yiraahdaa?
2. Soomaaliya maxay u dooratay hannaan ku dhisan hantiwadaag iyo hawlqabsi?
3. Sinnaan caaddilnimo, shaqo laga wada siman yahay, hannaankee lagu gaari karaa?
4. Wax ka sheeg erayadii " Jaalle Moxammad Siyaad Barre uu ka yiri hantiwadaagga?

# MIYIGA

Dhaqaalaha Soomaalidu badi wuxuu ku dhisan yahay Miyiga. 60% Soomaalidu waxay ku nooshahay Miyiga. Xoolo iyo nafley dalkeenna ku nool ayaa miyiga joogta. Miyiga Soomaalidu wuxuu leeyahay daaq wanaagsan oo xoolaha iyo nafleyda ku filan. Miyigu wuxuu leeyahay dooxooyin, banan, gubad, oogo iyo carro san Intaas oo dhan xoolaha iyo nafleydaba waxay u leeyihiin daaq wanaagsan. Gumeysigu wuxuu ku dadaaley, in dalkeenna uu ku rido daaqguur sidii xooluhu ay uga dhammaadaan.

Dooxooyinka iyo xallimada waxaa daaqa geela. Carra sankana waxaa daaqa geela iyo lòdaba. Tobankii sano oo aannu soo dhaafnay dhulkii waxaa ku yaraaday daaqii iyo biyihii. Taasina waxay ka dhacday maamulxumadii tiilley dalkeenna. Dhaqaalaha miyiga waxaa ku dhacday dacati weyn iyo khasaarto aan laga sheekayn karin. Dadkii oo dhan ayaa miyigii ka soo qaxay oo u soo qaxay magaalooyinka. Taasina waxay dhacday markii reer miyiga laga tashaday oo wax loo qaban waayey oo daaqii iyo biyihiiba laga qaaday. Daaqguurka haddana waxaa u sabab ahaa dagaal, dhac, geeri iyo colaad aan kala joogsanayn. Nolosha dadkeennu waxay ku dhisan tahay miyiga, miyiguna wuxuu ku dhisan yahay daaqa iyo biyaha, daaqhelid iyo biyohelidduna waxay ku dhisan yihiin nabad iyo colaad la'aan. Reer miyigu weligiis hasillahaan iyo nabad meel uma uu degin, meelaan nabadi jirinna daaq iyo biyo la'aan bay leedahay.

Nabadda miyiga, ayaa horukac kasta sabab u ah. Reer miyigu markuu nabad u daaqo, ayuu dhaqaal wanaagsan dalka soo gelin karaa. Tawraddii Oktoobar 1969 ka dhalatay dhulkeenna tillaabadii ay ugu horqaadday tillaabooyinkeeda, waxay ahayd in nabad dhulka laga soo dhaliyo, daaqa iyo biyuhuna dadka ay u wada dhexeeyaan. Nin gabayaa ahi wuxuu yiri,

Illeen godobi surinkaad marataba sabad qarsoon weeye
Illeen nabadi sahaydaada ood sidato uun weeye!

Layli:

1. Daaqu dhaqaalaha dalkeenna muxuu u leeyahay?
2. Tarmidda xoolaha iyo nafleyda maxaa u dan ah?
3. Tillaabadii Tawraddii Oktoobar 1969 ay ka qaadday miyiga maxay ahayd?

* * * * * * * * * * * *

""".... Innagu waxaannu dhisaynnaa qaran Soomaaliyeed ee wada jira oo xoog leh, kuna dhisan wanaag caddaalad, dinnaan iyo nabad. "— Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya ( Oktoobar 23, 1969).

ISMAACIIL MIRE

Waqtigii ay soconaayeen dagaalladii dhex maray.Daraawiishta iyo gumeystayaalkii, ayaa Ismaaciil Mire in badan isagoo maqan maalin ku soo noqday reerkiisii. Dabadeed, intuunan fariisan oo weli faraskiisii ku joogo,ayaa qaylo u timid oo loo soo sheegay inay gaaladii duullaan ku soo saartay. Dabadeed, isaga oo aan gurigiisii koob biya ahna ka cabbin,ayuu dib u laabtay. Afadiisii oo kaydkii u soo dhigtayna wuxuu kaga ambabaxay oo ku yidhi:-

Faadumooy falaadkayganaan fiiro kaa bariye
In faseexad loo wada hadlay gobi ku faydaaye
Fahmadaba adoon qaadan baad feedho hadashaaye
Fakaloonka iyo gaadhka badan feeyigaan bidaye
Ma furfuro habeynkii guntiga foora soo dhacaye
Feddedaan wareegaa sidii faraw ugaadheede
Ferenjaan ilaalinahayaa fooska soo baxaye
Fujaammaadan la ii soo sido iyo fookha malabaysan
Xeedhyahan fandhaallaysan iyo faakhir labenkeeda
Fartaydaa anoon saarin baan fuuli looshangra
Foolkii astaadkaan ku helay faydo iyo khayre
Faatoxo markuu ii maraan farax dhaqaaqaaye
Ma faqriyo shareecada ninkii faraqa hasytaaye
Inaan adiga kaa fiigayaad iga filaysaaye
Furuq igu dilee naag kaloon faraha saaraaye
Ha furfurin dermedan layga waa inaan fadhiistaaye.

# XEERKA U HOGGAANSANAANTIISA

Mudda laga joogo malaayiin sannadood dadka adduunka ku nool, waxay ahaan jireen sida dugaagga. Dadku wuxuu ku noolaan jirey duurka, maxaa yeelay, waagaas ma ay jirin magaalooyin ama tuulooyin. Xaas walba keli ahaan buu u noolaan jirey.

Markii dambe, dadkii wuxuu ogaadey in kala degganaantu ay dhibaato u keentay. Ka dib waxay billabeen inay dhistaan tuulooyin si ay isaga kaalmaystaan dhibka iyo dheeftaba. Mudda yar ka dib, markii ay tuulooyinka dhisteen, dadkii wuxuu sameeystey xeer ay isku xukumaan si ay dhexdooda u kala nabad galaan.

Tuulooyinkii waxay noqdeen magaalooyin waaweyn. Dadkii aayar aayar baa magaalooyinkii u soo degéy. Wada degganaanta dadka, waxaa ka dhalatay aqoon wanaagsan, hawshii baa badatay, ka dibna, noloshii baa fiicnaatay. Markaas ka dib isu talis baa bilowday. Dad madax ah baa la magacaabay kuwaas oo xukunkii ku fulin jirey xeerka uu dadka degsadey.

Qarnigan 20 -naad, dawladaha badidood waxay leeyihiin xeer u degsan dadka iyo dalkaba. Xeerkaas waxaa ogalaada dad weeynaha, ka dibna waxaa fulisa dawladda ayadoo ka wakiil ah dadka. Xeerka markii dad weynuhu ogalaado, nin walba oo dadkaas ka mid ahi, ama dalka deggani, waa inuu u hoggaansamaa. Qofna keli ahaan uma diidi karo xeerkaas oo waa ku sandulle. Ma jiro qof ka weyn xeerka, maxaa yeelay, qof kasta wuxuu

ku jiraa maganta xeerka.

Waagii hore, Soomaalidu waxay lahaan jirtey xeer ay isku xukunto. Qofkii aan dhawrin xeerkaas, wadajir ayaa Soomaalida looga saari jirey oo la cambaareyn jirey amase la ciqaabi jirey.

<u>Layli</u>:

Erayadan tixo ku dar: keli degganaan. Tuulooyin. Duur. Dhib. Dhoef. Iskaalis.

1. Waagii hore dadku see buu ahaan jirey?
2. Xeerka yaa u dejiya dadka yaase fuliya?
3. Xeer maxaa la yiraahdaa?

* * * * * * * * * * *

"""... Waqtiga tawriga ah musuqmaasuqi may jirto; mana ay jirto eexasho loogu eexdo qof sarrayntiisa maamulka dawladda, sidii jirtey waayihii dawladihii dibusocodka ahaa. "--- Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya ( 4 Diseembar 1971).

## SIDA MAGACU JAMAC U NOQDO

Sida magac dheddig, ama lab ay u noqdaan jamac xeerer gaar ah bay kala leeyihiin. Af - Soomaaliga erayadiisa dheddigi siyaalahan soo socda ayay jamac u noqdaan:

1. Erayada mufradka ah qaarkood "O" ayay xagga dambe ka qaataan; eg:

   Kab - kabo
   gabadh - gabdho
   gees - geeso
   daar - daaro
   waxar - waxaro

2. Qaarna "oyin" bay xagga dambe ka gaalaan. Kuwaasu waa kuwa markay mufradka yihiin "O" u dambayso; eg:

   Darmo - darmooyin
   Duudumo - duudumooyin
   Hooyo - hooyooyin

Layli:

Tixahaan kore mid walba 5 kale madaxaaga uga qor adoo tanu dhigan la raacaya.

## DALXIISNIMO

Dalxiisnimadu waa daawashada dadka, dalka iyo nafleydaba. Dalka Soomaalidu wuxuu leeyahay xeebo dhaadheer, buuro, bannaan, dooxooyin, gubad, cogo, iyo dhul carro san ah. Intaas waxaa dalkeenna u raaca cir buluug ah oo aan caad lahayn iyo dayax nayloqaad ah. Daawasha intaas oo dhammi, waxay u leedahay nafta raaxo iyo xasillooni. Dadku abuurta waa ka barbar, maxaa yeelay, abuurta waa hooyadeen. Kasmada iyo aqoonta sarraysa, waxa laga helaa abuurta. Ninka gabayaaga ahi, gabaygiisa wuxuu tiriyaa markii uu daawado abuurta ku wareegsan. Dhulka Soomaalidu intaas waxaa u weheliya qorrax marla arko iftiimaysa oo aan weligeed qarsoomin.

Adduunka waxaa ku yaalla dhulal aan qorraxda laga arag. Dhulalkaasi dhib weyn ayay ku qabaan qorrax la'aanta. Dalkeenna waan jecel nahay maxaa yeelay, isaga ayaan ku dhalannay kuna dhimanaynnaa. Dalxiisnnimadu waxa weeye inaad dalkaaga aqootaa oo daawataa. Daawashadu waxay u kala baxdaa daawasho guud ah iyo tu gooni ah. Haddaad daawasho guud ah doontid, waa inaad Dalka to dhan ku soo wareegtaa. Haddiise aad rabtid daawasho gooni ah, waa inaad tagtaa meelaha taariikhda leh amaba dhulka nafleydu ku noolahay.

Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya waxay leedahay dhul weyn ee xoolo, ugaar, shinbiro, halaq iyo cayayaan ku nool yihiin. Badaha dalkeenna waxaa ku nool kalluun iyo nafleyda badda. Nafleydaas berri iyo baddaba ku nool, waxtarmo waxay u leeyihiin kasmada cilmiga sayniska. Haddii qofku jecel yahay inuu soo daawado goobaha, magaalooyinka, tuulooyinka

taariikhda leh,wuxuu soo booqan karaa goobihii Daraawiishta iyo gumeysiga dagaalku ku dhex maray. Qalcadii Daraawiishta oo ku taalla Taleex ayuu dalxiisku teggi karaa. Goobihii Daraawiishta iyo abbaanduulahoodii Ina-Cabdille Xasan ay kula dirireen gumeysiga waxaa ka mid ah:

Gumburro - Daratoole - Batala - Ilig - Jidbaale Firdidin, Iridda Aamin, Erego, Burco iyo meelo kale oo badan. Dalxiisku wuxuu haddana soo daawan karaa magaalooyinka taariikhda leh.

Magaalooyinkaas waxaa ka mid ah: Muqdishow, Berbera, Marka, Baraawe, Cadale, Hobyo, Seylac, Kismaanyo, Warshiikh iyo Jasiiradaha degmadaas Kismaanyood.

Muqdishow waxaa ku yaalla masaajidyo taariikh aad u fog leh. Masaajidyadaas waxaa ka mid ah: Masaajidka Arbaca Rukun - Jaamaca - Cabdulcassiis - Fakhruddiin iyo kuwa Xamar Weyne ku yaalla iyo taalladii Burtuqiisku ka taagey dhulkeenna.

Dalxiisnnimadu horumarintoodu dhaqaalo xoog leh ayay dalkeenna u soo jiidaysaa. Dalxiisyada shisheeyaha ahi, way imaan lahaayeen dalkeenna, haddii laga shaqeeyo dalxiisnimada.

Layli:

1. Dalxiisnnimo maxaa la yiraahdaa?
2. Dalkeenna meelaha la daawado wax ka sheeg?
3. Dalxiiska shisheeyuhu muxuu jecel yahay?
4. Sidee lagu noolayn karaa dalxiisnnimada?

## DHALLINYARO

Dhallinyaradu waa ubaxa dhulkeenna iyo daljirradii dadka iyo dalkaba. Dhallinyaradu waa halyeeyadii daafaca dhulkooda mar la arko u soo jeeda. Dhallinyarada dhulkooda waa inay ka xoreeyaan gumeysiga iyo gumeysiga cusub iyo xoogga imberiyaalistaha.

Dhallinyaradu naftooda waxay u huraan dadkooda iyo dalkoodaba sidii gumeysiga uga celin lahaayeen. Dhallinyaradu waa inay daafacdaa hantiwadaagnnimada ku dhisan cilmiga ee ay ka daafacdaa xoogga dibusocodka. Dhallinyarada heegganka u taagani, waa kuwa dalkooda iyo dadkoodaba u taagan mar walba.

## DHALLINYARO ( hees)

Waxaa maanta soo dhacay
dhawaaqii xornimadoo
dhogor caafimaad baa
nagu wada dhammaataye
dhallaankiyo carruuraha
dhaxal aan u reebnoo
dhaqankiyo hiddaha lumay
dhaqso aan u gaarnee

wadajir

Dheg xumaatiyo caydiyo
dhiiftiyo gaajada
cirka duul ka soo dhacay
ina dhaafimaayee
dhulku wuxuu sugayaa
dhudhunkeenna weeye

Dhallinyaro ogsoonow!
faallaan dhex gelayaa
dhallinyarada maantay
dhegihiinna ii fura
dhuunigu is yeeliyo
dheel kuma yimaadee
dhawrtayste gelin baa
dhaashi buu ku wacanyee
la dhuumay gacantii
ii dhiibta haysee

wadajir
Dheg xumaatiyo caydiyo
dhiiftiyo gaajada
cirka duul ka soo dhcay
ina dhaafinmaayee
dhulku wuxuu sugayaa
dhudhunkeenna weeyee

....................

Dhurwaaguba ood dheer
wuxuu uga dhacaayaa
wuxuu dhacan qarooniyo
miscisha u dhanbaalayaa
haddii aadan dhibaatoon
hilib kama dhergeyside
dhaqaaleyste xooggow!
berri baad la dhimannine!

.....Cabdullaahi Yuusuf Farey.

* * * * * * * * * * * *

""".. Shaqada oo loo wada jiraa, waxa weeye hubka keliya ee aan ku gaari karno barwaaqo iyo bashbash.
"---- Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya ( 6 Febraayo 71).

## OKTOOBAR ( 1969)

21 Oktoobar 1969, ayaa waxaa ka dhalatay dhulkeenna Tawrad. Tawraddaas waxaa madax ka ahaa Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Guddoonshaha Golaha Sare ee Tawradda. Tawraddii Oktoobar, waxay ka dhan-ahaad maamulxumadii tiillay dhulka oo ay ka mid ahayd musuqmaasuq, afmiinshaarnimo, qabiilnimo iyo eexasho. Tawraddii Oktoobar waxay dumiscy hannaankii ku dhisnaa dulliga iyo gumeysiga cusub. Tawraddii Oktoobar waxay u dhalatay inay caddaalad, sinnaan iyo hantiwadaagnimo u dhisto dadkeenna.

Tawraddii Oktoobar waxay dhan ka tahay gumeysiga, gumeysiga cusub, xoogga imberiyaalistaha iyo midab gumeysiga. Heestan waxaa tiriyey: Kooxda waaberi:

1. Oktoobar waa daruur hillaacdayoo
   Soomaalida u da'dayoo
   ay ku doogsadeen
2. Waagii baa dillaacoo
   dabkii baa la qaadoo
   xaqii baa doonoo
   xumihii baa la daadshoo
3. Xooggii baa dadaaloo
   xukunkii dalka haystoo
   dadkuna waa ku raacoo
   hanbalyo diiraan hooya!
4. Sidii ul iyo durkeed
   waysku duuban nahayoo
   dood iyo dagaalna
   uma kala danbaynnoo

5. Dalkii iftiimay
Dadkii waw riyaaqay
gumeysi baannu duminney
dulli baynnu diidney

OKTOOBAR -------- OKTOOBAR ----- OKTOOBAR

( Cali Sugulle )

Layli:

1. Tawradii Oktoobar goormay dhalatay, qasdigeeduse waa maxay?
2. Golaha Sare ee Tawradda Oktoobar bal ka sheekee?
3. Yaa madax ka ah guddiga golaha sare ee Tawradda?

....... " Waxaannu doonaynnaa inaannu dhismo dhan ku dhisan wadajir, sinnaan, caaddaalad iyo horukac. Intaas oo dhammi waxay ku jiraan hantiwadaagnimada ku dhisan cilmiga ee aannu u doorannay horukaca dalkeenna.

"....... Jaalle Maxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliga(7 Sabteembar 1970).

# TELEFOONKA

Gaadiidka iyo warfaafinta cusub ee haatan lagu dhaqmaa waxay dhab u soo dhaweeyeen fogaantii iyo muddadii loo kala socon jirey laba dal, ama laba meelood. Sidaas darteed, waxa la yiraahdaa dunidii waa soo dhawaatey. Alaabada warka faafisa ama meel gaarsiisa waxaa ka mid ah taarka, telefoonka, wargeyska raadiyaha, televiishanka iyo kuwa kale. Alaabadaas mid walba midka kale ka yaab badan, mid kastana waxtarkeeda lama koobi karo. Horuukaca qarniga labaatanaad la gaarey, ma jireen farsamadaas la'aanteed, horuumarka aqoontuna heerkuu haatan joogo ma gaareen.

Qofkaan ogeyn in xoog eletrikada ku jiro, ma garan karo farsamada iyo sida telefoonku u shaqeeyo. 1875 nin Maraykan ah ee la yiraahdo Aleksandar Graham Bell, ayaa hindidey telefoonka. Aleksandar wuxuu ogaadey in xoogga eletrikadu siligga dhex mari karo. Ninkaasu wuxuu kaloo gartay in xoogga leetrikada ee hawada sare oo dhan ku galoolan inuu codka dafo, sida dabayshu u qaaddo baalasha shimbiraha, xaashida iyo waxa fudfudud oo dhan. Sidaas darteed, labada qof ee telefoonka ku wada hadlaya codkooda siligga ayaa dafa oo qofba codkiisa kan kale dhegtiisa ku rida. Sidaasay laba qof isu maqli karaan.

Telefoonku qayb weyn buu ka qaatay xagga warfaafinta oo warqaddii laysu qori jirey, ama

farriintii laysu diri jirey, sida badan, telefoonka ayaa beddeley. Adoo Xamar jooga, Kismaanyo ama meel ka fog, baad qof kale telefoon kula hadli kartaa. Sidaas daraaddeed, telefoonku taarka ka dhaqsa badan. Tiirar la taago tan iyo Kismaanyo iyo silig ku taxan baa telefoonku u baahan yahay.

Shaqada xafiiska iyo guriga wax weyn buu ka taraa telefoonku. Ninka xafiiska u taliya isagoo kursigiisa ka kicin, ayuu wada fari karaa dadka ka hoos shaqeeya. Haddii guri gubto, ama qof bukoodo telefoon baa la diri karaa, si ciidanka dabka demiyaa ama dhakhtarku degdeg ay ugu yimaadaan meeshii dhibaatadu ka dhacday.

Telefoonku sidaasuu waxtar weyn ugu leeyahay nolosha iyo horuumarka dadka. Ninkii hindiseyna dadnimadeenna ayuu sare u qaaday.

Layli:

1. Erayadan magacyo u rog.

   fog tahay, farsamee, aqoonso, hindisey.

2. Kuwaanna fal ka dhig.

   Hurumarka, qaadis, shaqada, taagniin.

3. Aleksandar Graham Bell, muxuu ku kordhiyey telefoonka?

4. Taarka iyo telefoonku maxay ku kala duwan yihiin?

## MUFRADKA SIDUU JAMAC U NOQDO

Haddana waxa lagu tusayaa sida mufradka labi jamac u noqdo:

Mufradka labi 5 siyood buu jamac u noqdaa; eg:

1. Dab - dabab,
   Raad - raadad
   Hal - halal
   Mas - masas
   Af - afaf

2. Wadaad - wadaaddo
   Hadal hadallo
   Maqaar - maqaarro
   Dabar - dabarro
   Albaab - albaabbo

3. Waraabe - waraabayaal (ama) waraabayaw
   Orgobo - orgobayaal (ama) orgobayaw
   Oday odayaal, odayaw (Oday odayaal odayaw)

4. (a) Macallin - macallimiin
   Daallin - daallimiin
   (b) Darwiish - daraawiish
   Qalin - qalmaan, qalimo
   Kitaab - kutub, kutubbo.

5. (Balli - balli), (Dibi - dibi), (Awr - awr), carab - carab), (cawl - cawl).

**Layli:**

Isku day inaad 6 jaad ee casharkaan aad ku baratay, inaad 2 tixood ka samaysid.

## SAYID ABUU BAKAR ( KHALIIFKII KOWAAD)

Sayid Abuu Bakar, Ilaahay raalli ha ka ahaadee, wuxuu ka dhashay Qurayshta Makood. Shaqadiisuna waxay ahayd ganacsi, maal badanna wuu lahaa, deeqsina waa ahaa. Sayid Abuu Bakar wuxuu ahaa qofkii ugu horreeyey ee diinta Islaamka galay. Nebigeennuna wuu la tashan jiray oo aad buu ugu kalsoonaa, wuxuuna ka dhigtay jaal. Sidaas baana loogu magacaabay jaallihii Nebiga.

Sayid Abuu Bakar wuxuu ahaa ninka qura ee u wehel yeelay Nebiga markii uu Maka ka qaxay. Dagaal markuu Nebigu galaba, Sayid Abuu Bakar wuu garab taagnaan jiray. Markii Nebigu bukooday, wuxuu faray Abuu Bakar inuu tujiyo dadka Islaamka ah. Ka dib markuu Nebigii dhintayna, asxaabtii waxay la noqotay inuu Abuu Bakar Khilaafadda qabto, kol hadduu salaaddiiba tujiyey markii Nebigu bukooday.

Sayid Abuu Bakar lama koobi karo waxyaalihii uu Muslimiinta u qabtay. Middase ugu weyn waxay ahayd, dagaalkii uu la dagaallamayay nimankii diinta ka baxay markii Nebigu dhintay. Wuxuu kaloo aad u adkeeyey sakadii. Wuxuuna ku dhaqaaqay oo bilaabay uruurinta Qutaanka.

Sayid Abuu Bakar, wuxuu dhintay sannadkii 13 ee Hijrada ( 636 dh.C.). Waxaana lagu aasay qabriga Nebiga agtiisa ee ku yaalla Madiina.

**Layli:**

1. Sayid Abuu Bakar maxaa lagu yiqiin?
2. Sayid Abuu Bakar muxuu taray dadkii muslinka ahaa?
3. Sayid Abuu Bakar, Islaamka ka hor muxuu ahaan jiray?

MAAHMAAH

1. Nin faas lihi qoryo ma waayo.
3. Nin keliya daran, ayaa kaadiyu dishaa.
3. Dhallaan dhunkasho wax ugu taallo ee dhiishiisaa wax loogu shubaa.
4. Wax la cuno iyo way baa lagu nool yahay.
5. Waxa la yiri: Rag waa talo keen ama talo raac.
6. Nin qosol badan iyo qoonsimaad badani ways qab dhaafaan.
7. Nin ani yiri aad iska sooc.
8. Aan hadalnno waa aan heshiinno.
9. Beeni mar bay ku waraabisaa kumase rakaadiso.
10. Ilko wadajir bay wax ku gooyaan.
11. Arrin la'aan rina looma qasho.
12. Ari bahal ku jiro ma didmo daayo.
13. Soomaalidu been way sheegtaa, beense ma maahmaahda.
14. Ooda dhacamood siday u kala sarreeyaan baa loo kala qaadaa.
15. Qun yar socde qodaxi ma muddo.
16. Tuugsi aadame tuur bay kuu yeeshaa.
17. Intii calooshu buki lahayd cagtu ha bugto.
18. Mito gunti ku jira miro geed saaran looma daadsho.

# CAASHAQA

Caashaqu waa wax jira oo aadmiga dheddig iyo laboodba ku dhaca. Waa wax aan dheeldheel iyo is tus iyo ha lagu maqlo ama ha lagu arko midna ahayn ee qofka iskaga beerma ama lagu beero. Soomaaliya, inta laga warqabo caashaqa dhabta ahi kuma badna. Wuxuu ku dhacay ama ku dhacaa in yar oo tiro lagu heli karo.

Sidaan wada ognahay qof caashaq ku dhaco Soomaalida waxaa ugu darraa Cilmi Boondhari. Waxaana la caddeeyey inuu in badan u bukay, dabadeedna uba dhintey Cilmi intuusan dhiman waqtigii uu la jiifey xanuunkii Caashaqa gabayo badan ayuu ka tiriyey. Gabayadiisiina waxa ka mid ahaa kan halkan ku qoran. Wuxuu Cilmi Boondhari yidhi:-

Caashaqa haween waa horaa canddiil soo rogaye
Sayidkii carshiga nuuray iyo Caliba soo gaadhye
Carruurtey sideen meesha iyo Ciise Nebigiiye
Cidla lagama beereen dadkoo cuud waaxidaba
Waxa caynba cayn looga dhigay hays cajebiyeene
Soomaalidaa caada xunee iguma caydeene
Sida weelka caanaha haddii laabta loo culayo
Bal aad soo cidaadee maxaa cunaha dhaafaaya
Inaanse cadaydo mooyee waxaan caldsho la ii diidye
Casharkay wadaaddadu dhigeen cudurkan goyn waaye
Cilmi iyo dawaba doontey oo waayey cilinkiiya
Illayn caashaq lama maydhi karo kugu cirrooloobay.

## HODONNIMO DHULKEENNA WAA LAGU HUBAA

Heestani waxay soo baxday maalintii gumeystayaalka Amerikaanka iyo reer galbeedku ay yiraahdeen, " Soomaaliya waanu ka goosanaynaa wixii aannu siin jirney Soomaalida, iyagoo ka caraysan dhaqdhaqaaqa Tawriga ah ee Soomaaliyeed iyo horukaca runta ah. Dabadeed anoo ku halqabsanaya oo tilmaamaya niyada Soomaalidu u leedahay wax qabsiga, cadowgana aan u hanjabayo, waxaan tiriyey heesta la yiraahdo Hodonnimo Dhulkayga waa lagu hubaa.

1. geela hawdka daaqaa
   halleelada irmaan
   lòda harada joogtaa
   hawl yaraha arigaa
   yaannu haysannaa
   Hodonnimo dhulkayga
   waa lagu hubaa
   halla tago cawaawuhu
   hiil iyo wuxuu
   hoo noo hidin lahaayoo
2. Himirtiyo mareerkaa
   higlada iyo ciidkaa
   hinigiyoo mircoodka
   halguduuda yicibta
   hohobta aan gurtee
   hodonnimo dhulkayga
   waa lagu hubaa
3. Webiyadaa haraaciya
   beeraha hadoodilan
   haruubka iyo muuska

halkastaba aduunyada
uga haqabla'nee
Hodonnimo dhulkayga
waa lagu hubaa

4. Hoobaani ciid yahay
hoodaale calan yohow
wallee kuma hagradoo
hareertaan ka taag nahay
ninna kuma halleeyoo
hodonnimo dhulkayga
waa lagu hubaa.

Ismaaciil Xirsi, 1970

* * * * * * * * * * * * *

"""...Saboolnimo gobonnimo iyo sharaf leh, waxay ka doorroon tahay hodannimo iyo barwaaqo gumeysi leh, gobonnimada iyo sharaftu waxay ku jiraan isku kalsoonideenna iyo awoodeenna!
"— Jaalle Moxammad Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya
( 11 Sabteembar 1970).

TUSMADA BUUGGA

BAALI.......

1. Waran iyo Kitaab.
2. Is raaca Soomaaliyeed
3. Munishiibiyada
4. Abaalgud
5. Kaboole
6. Qodbaha Magacyada Dheddig
7/8 Ina hooyo waa Uur Halmeed
9/10 f a a l
11/12 Kristofar Kolombo
13. Warqad Arday Saaxiibkiis u diray
14. Duurjoogta Yaabka leh
15/16 Saddex Dibi iyo Libaax
17. Afrikaay Huruddoy
18. Xaaska Wanaagiisa
19/20 Guriga Hiddaha
21/22 Qawladda Ganacsiga
23. Xiriiryeyaalka Hadalka
24/25 U Halganka Gobannimada
26/27 Boostada
28. Mingis iyo Wadaaddo
29/30 Raago Ugaas
31/32 Warshadda Dharka
33/34 Jidadka iyo Wedooyinka
35 Qodbaha Magacyada Lab
36 Gulyelmo Markooni
37/38 Hawl iyo Hanti Wadaagnimo

39/40 Miyiga

41. Ismaaciil Mire

42/43 Xeerka u Hoggaansanaantiisa

44. Sida Magacu Jamac u Nqodo

45/46 Dalxiisnimo

47/48 Dhallinyaro

49/50 Oktoobar (1969)

51/52 Telefoonka

53. Mufraadka siduu Jamac u Noqdo

54. Sayid Abuu Bakar

55. Maahmaah

56. Caashaqa

57/58 Hodonnimo Dhulkeenna waallagu Hubaa

———o———